QIIMAYNTA SHAQAYNTA

(Loo soo xigtay Kormeeraha Guud ee Dugsiyada Dadweynaha Boston)

Magaca:	Mary Skipper
Taariikhda Dhammeystirka:	Juulaay 2023
Waxa la dhamaystiray:	Mary Skipper
Nooca Qorshaha Baraha	Qorshaha Koritaanka Is-Dirista

QEEXITAANADA DARAJOOYINKA

SI AAD AH WAX KU OOL AH (Ku dayasho mudan)	Waxqabadka ayaa aad uga sarreeyay filashooyinka iyada oo ay ugu wacan tahay tayada sare ee shaqada laga keensaday dhammaan dhinacyada muhiimka ah ee mas'uuliyadda, taasoo keentay guud ahaan shaqo tayeysan oo heer sare ah; iyo midood 1) waxaa ka mid ahaa dhammeystirka hadaf weyn ama mashruuc, ama 2) waxaa la sameeyey wax ku biirin aan caadi ahayn ama gaar ah oo lagu taageerayo hadafyada cutub, waax, ama degmo. Darajo siintan waxaa gaari kara shaqaale kasta in kasta oo aan badanaa la bixin.
WAX KU OOL AH (Karti Leh)	Waxqabadka wuxuu si joogto ah uga sarreeyay filashooyinka dhammaan meelaha lagama maarmaanka u ah mas'uuliyadda, iyo tayada shaqada guud ahaan waxay ahayd mid aad u sarreyso. Yoolalka sanadlaha waa la gaaray.
KOR USOO KACAYO (Karti Leh)	Waxqabadka wuxuu si joogto ah u gaaray filashooyinka dhammaan meelaha lagama maarmaanka u ah mas'uuliyadda, iyadoo mararka qaar ay suuragal tahay ka sarreynta filashooyinka, iyo tayada shaqada guud ahaan waxay ahayd mid aad u fiican. Yoolalka sanadlaha ah ee ugu muhiimsan waa la gaaray.
SI HOOSE WAX KU OOL AH (Ubaahan Hagaajin)	Waxqabadku si joogta ah ma u gaarin filashooyinka – waxqabadku wuu ku guuldarreystay inuu gaaro filashooyinka mid ka mid ah ama ka badan meelaha lagama maarmaanka u ah mas'uuliyadda, iyo/ama mid ka mid ah ama ka badan yoolalka sanadlaha ah ee ugu muhiimsan ma la gaarin. Qorshe horumarin xirfadeed ah oo lagu hagaajinayo waxqabadka waa in lagu xiraa, oo ay ku jiraan jadwallo, oona lala socdaa si loo cabbiro horumarka.
MA AHA WAX KU OOL (Laguma Qanci Karo)	Waxqabadka wuxuu si joogto ah uga hooseeyay filashooyinka inta badan meelaha lagama maarmaanka u ah mas'uuliyadda, iyo/ama horumar macquul ah oo ku saabsan yoolalka muhiimka ah lama sameynin. Hagaajin la taaban karo ayaa looga baahan yahay mid ka mid ah ama ka badan meelaha muhiimka ah. Qorshe lagu saxayo waxqabadka, oo ay ku jiraan jadwallo, waa in la dejiyaa oona lala socdaa si loo cabbiro horumarka.

HEERKA I: Hoggaaminta Waxbaridda

Hogaamiyaha waxbarashadu wuxuu kor u qaadaa waxbarashada iyo koboca ardayda oo dhan iyo guusha dhammaan shaqaalaha isagoo kobcinaya aragti wadaag ah oo ka dhigaysa waxbaridda xooggan iyo barashada mid udub dhexaad u ah dhigashada iskuulka.

Aagaga Gaarka ah ee Diiradda La Saarayo:

- 1-A Manhajka
- 1-D Qiimeynta Heerka
- 1-E Go'aan Qaadashada Xog Wargelisay
- 1-F Waxbarashada Ardayga 1-A Manhajka
- 1-B Waxbaridda
- 1- C Qiimeynta
- 1-D Qiimeynta Heerka
- 1-E Go'aan Qaadashada Xog Wargelisay
- 1-F Waxbarashada Ardayga

Toosinta Yoolka Kormeeraha Guud:

- Kala hormarinta iyo Dardar gelinta Waxqabadka Waxbarashada
- Xoojinta Helitaanka Barashada Shucuurta Bulshada
- Kordhinta La Xisaabtanka Xafiiska Dhexe iyo Dugsiyadeena labadaba

DARAJADA:

	SI AAD AH WAX KU OOL AH
x	**WAX KU OOL AH**
	KOR USOO KACAYO
	SI HOOSE WAX KU OOL AH
	MA AHA WAX KU OOL

FAALOOYINKA:

Heerkan I wuxuu bixin doonaa tusaalooyin ku saabsan shaqadeenna la xiriirta

- Nidaamyada Kala Duwan ee Taageerada
- Tacliinta Loo Siman Yahay
- U dhanaanshaha
- Waxbarashada Labada Luqadood
- Qorshaha Istiraatiijiyadeed ee Xafiiska Waxbarashada Luuqadaha iyo Dhaqanada Badan (OMME)
- Fursadaha Kulleejka Hore
- Ballaarinta Barashada Tignoolajiyadda Xirfadda
- Taageerada Ardayga-Dadaalada Fursadda Dhallinyarada Saaqido/Shaqada Maqnaanshaha Xad dhaafka

Arday kasta waa inuu lahaadaa waxbarasho adag, heerar ku salaysan dhaqan iyo luqad ahaanba ka jawaabaya oo uu ku helo jawiga ugu caraqalada yar. Si loo baraaro, ardayda waa in la siiyaa adeegyo joogto ah, fursadna u helaan wax ku barashada luqadda hooyo oo ka dhacda dhismaha dugsi soo dhaweynaya, amaan ah, waara, u dhow guriga, oo siinaya goobaha iyo tignoolajiyadda qarnigii 21aad.

10-kaan bilood ee la soo dhaafay tan iyo markaan noqday Kormeeraha Guud, waxaan bartay dibna u bartay wax badan oo ku saabsan dugsiyada BPS. Qorshaheena Hagaajinta Nidaamsan (SIP), warbixinada Golaha Dugsiyada Magaalo Weyn, xisaabinta xogta EY, booqashooyinka dugsiga, iyo la kulamidda ardayda, qoysaska, shaqaalaha, iyo la-hawlgalayaasha ayaa dhammaantood gacan iga siiyey inaan fahmo waxa shaqeeyey, waxa shaqeynayo iyo waxaan u baahanahay inaan badalno.

Dib ubarashadeyda dugsiyada BPS, waxaa ii cad inay jirto shaqo weyn oo ay tahay labadaba in wax laga qabto heer Degmo iyo dugsiyadeenaba si loo gaaro hiigsigan ardayda oo dhan. Dib sal ugu dhigidda Degmadeena hiigsi xooggan oo diiradda saaraya isla markaana dardargelinaya waxqabadka tacliinta isla markaana taageeraya dhammaan iskuulada inay noqdaan goobo loo dhan yahay iyadoo la kordhinayo helitaanka fursadaha barashada luqadda hooyo ee bartayaasha luqadaha badan iyo kordhinta helitaanka ardayda naafada ah ee deegaannada ugu carqalada yar, oo ay ku jiraan kuwa ku hadla luqadaha badan, waa mid ka mid ah meelaha aan mudnaanta koowaad siinayo ka Kormeeraha Guud ka ahaan.

Nidaamyada Heerarka Badan ee Taageerada & Tacliinta Loo Siman Yahay:
Iyada oo uu hogaaminayo Dr. Linda Chen, Kuxigeenka Sare ee Kormeeraha Guud ee Tacliinta iyo Dr. Drew Echelson, Madaxa Dugsiyada iyo La Xisaabtanka, waxaanu qaadnay tallaabooyin muhiim ah si aanu u xaqiijino in fasal kasta oo Dugsiyada Dadweynaha Boston ah uu leeyahay waxbarid xooggan o heerka 1-aad ah (boggaga bandhiga 9 & 10) uuna yahay mid soo dhaweyn leh oo ay u dhan yihiin **ardayda** oo dhan. Intaa waxaa dheer, anagoo adeegsaneyna shaqadeena sinnaanta tacliinta, waxaanu abuurnay filashooyin guud waxaana siinnay tababar gaar ah, agab iyo qeybo si ay shaqaaluhu u hubiyaan in dhammaan ardayda, gaar ahaan kuwa taariikh ahaan la xaqiro, si buuxdo uga dhabeeyaan kartidooda una noqdaan akhristayaasha iyo hal abuurayaasha qoraallo awood leh.

Ku darista Ardaydeena Naafada ah iyo Bartayaasha Luqadaha Badan:
Gaar ahaan ku saabsan shaqadeena aan la leenahay bartayaasha luqadaha badan, waxaan sidoo kale sii ballaarinaynaa wax ku barashada labada luqadood, helitaanka luqadda Hooyo iyo ka shaqeynta hirgelinteena qorshaha istiraatijiyadeed ee OMME (qorshaha). Sanadkan waxaan bilownay inaan eegno natiijooyinka ka soo baxay hirgelintaas. In badan oo ka mid ah bartayaasheena ku hadla luqadaha badan ayaa helaya adeegyada ay xaqa u leeyihiin marka loo eego sanadihii hore iyo in kasta oo aan wali haysanno shaqo aad u badan oo aan qabanno, waxaan haysannaa inta ugu badan boqolkiiba ilaa maanta oo qeyb ka ah heshiiskeena Waaxda Caddaaladda ee bartayaasha luqadaha badan ku hadla ee helaya adeegyada ku habboon. Waxaan ka soo kacnay 89% helitaanka qadarka ku habboon ee baridda Af-Ingiriisiga loo baahan yahay oo aan hadda marayno 94% ee bartayaasha luqadaha badan ku hadla ee hela qadarka ku habboon ee baridda Af-Ingiriisiga loo baahan yahay. Natiijooyin dheeri ah oo la xiriira qorshaheena istiraatiijiyadeed ee OMME iyo bartayaashayada luqadaha badan ku hadla ayaa laga heli karaa halkan.

Marka ay timaado shaqada aan la leenahay ardaydeena dhigata waxbarashada gaarka ah, sanadkan la soo dhaafay waxaan la shaqeynay koox ka badan 22 iskuul si aan u sameysano kooxahooda qorsheynta ka mid noqoshada maadaama ay bilaabayaan shaqada loo beddelayo iskuuladooda si loo taageero dhaqamada loo dhan yahay. Qaadashada casharada laga bartay sanadkan iyo in badan oo kamid ah talooyinka laga helay warbixinta Golaha Dugsiyada Magaalo Weynta (CGCS), waxaan si firfircoon uga shaqeyneynaa Qorshaheena Waxbarashada Loo Dhan Yahay oo loo gudbin doono DESE bisha Agoosto iyada oo qeyb ka ah qorshaheena SIP. Waan idinla wadaagi doonnaa qorshahaas marki la gudbiyo. Sanad dugsiyeedka 2023-2024, waxaan ka codsaneynaa dhammaan iskuulada inay yeeshaan Kooxaha Qorsheynta Ku Darista oona shaqeynayo si aan u soo saarno kooxeynta fasal ahaan oo barayaasheena u siino horumar xirfadeed oo dheeri

ah oo xaqiijin doona in shaqaaluhu haystaan tababbarka iyo kheyraadka ay u baahan yihiin inay ardaydeena ugu adeegaan meel loo dhan yahay oo ay ardaydu fursad u helaan wax ku barashada luqadda hooyo iyo deegaannada ugu carqalada yar.

Waxaan sidoo kale sii horumarinay siina kordhinay kheyraadka loogu talagalay dadaalada shaqaaleysiinteena iyo shaqaalo haysashada anagoo ballaarineyno barnaamiyadeena gudaha iyo kuwa garab-qabashada si markaa aan u haysano shaqaale luqad ahaan iyo dhaqan ahaan kala duwan, ku shahaadeysan waxbarashada gaarka iyo ESL, ee aan ubaahanahay inaan ku taageerno Qorshaheena Waxbarashada Loo Dhan Yahay. Deeqdeena waxbarideena waxay 24 macalin oo sanadka koowaad ah ku taageertay ruqsada hore ee naafada dhexdhexaadka ah iyo ESL waxayna Barnaamijkeena Barayaasha Labada Luqad/Dardargelinta Bulshada iyo Macalinka (ACTT) keentay 29 arday cusub oo qaangaar ah oo soo gala xirfadeena waxbaridda oo ay wehliyaan 41 arday oo ka tirsan Barnaamijkeena Macalinka Cadet. Waxaa jira 45 murashax oo ku jira deeqda iyo 31 macallimiin cusub oo suuragal ah oo ku jira ACT sannadkan soo socda. Intaa waxaa dheer, waxaan ballaarinay kooxda shaqaaleysiinta si aan ugu darno xubin dheeraad ah oo kooxda ka mid ah si aan diiradda u saarno dadaaladeena ku aaddan soo shaqaaleysiinta meelaha aadka loogu baahan yahay. Waxaan sidoo kale ku darnay maareeye shati oo awood u leh inuu taageero murashaxiinta gaarka u taagan iyo iskuulada si loo caddeeyo waxyaabaha laga filayo iyo helitaanka macluumaadka ku saabsan helitaanka shati qaadashada. Diiradda ugu weyn ee maareeyahan waxay ahayd shatiyada Naafada Dhexdhexaadka iyo ESL. Kooxda shaqaaleysiinta ayaa arrimaha diiradda la saarayo kala fadhiistay Xafiiska Waxbarashada Gaarka ah iyo Xafiiska Waxbarashada Luqadaha Badan iyo Dhaqamada Kala Duwan oo loogu talagalay in lagu soo jiito Naafada Dhexdhexaad ah iyo murashaxiinta haysta shatiga ESL waxayna sidoo kale ka soo shaqaaleysiisteen ilo diiradda saaraya horumarinta macallimiinta ee aagaggaas.

Ballaarinta Waxbarashada Kulleejka Hore iyo Farsamada Xirfadaha:

Dhanka ardaydeena dhigata dugsiga sare, waxaan rabnaa inaan xaqiijino inay dugsiyada BPS ka qalin jabiyaan iyagoo u diyaarsan kulleejka **iyo** xirfadda shaqada. Waxaan ballaarinay fursadaha kulleejka hore oo aan ka sameynay dugsiyo sare oo badan, anagoo raadkeena gaarsiinay 14 barnaamij oo ka jira toddobo dugsiyo sare oo BPS ah oo kala duwan sanad dugsiyeedka 2023-24, iyadoo tirada ardaydeena loogu adeego barnaamijyada Kulleejka Hore ay ka soo korortay 290 ayna gaartay 740. Waxaan ku dari doonaa ugu yaraan afar barnaamij oo dheeri ah oo laga sameeyo saddex dugsi sare oo cusub sanad dugsiyeedka 2024-25. Intaa waxaa dheer, waxaan barnaamijkeeni 13aad ee sanadka Koowaad ka daahfuri doonaa Dugsiga sare ee Fenway sanad dugsiyeedka 2023-24, iyadoo barnaamijkeena labaad sanadka xiga laga daahfuri doono Dugsiga sare ee Charlestown. Barnaamijkani wuxuu u oggolaan doonaa ardayda inay sannadkooda ugu horreeya kulleejka ku dhigtaan si bilaash ah isla marka ay ka qalin-jabiyaan dugsiga sare, iyada oo ay suuragal tahay in ardaydu ay dhammaystiri doonaan Shahaadada Labada Sano ah dhammaadka sannad dugsiyeedka ugu horreeya ee kulleejka.

Waxaan sidoo kale ballaarinay fursadaha barashada farsamada xirfadeed (CTE), gaar ahaan dariiqooyinka loogu talagalay iskuuladeena kale ee beddelka u ah dugsiyada sare iyada oo loo marayo soosaarista dariiqooyinkeena cusub ee Tababbarka Xirfadaha Iskudhafan. Dhaqan ahaan, waxbarashada beddelka kale ah ayaa diiradda lagu saaray sidii ardaydu u heli lahaayeen dhibloomadooda. Tani waa mid muhiim ah, laakiin waxaan rabnaa inaan sidoo kale xaqiijino in ardaydu ay diyaarsan yihiin oo ay leeyihiin qorshe marki ay qalin jabiyaan. Iyadoo tababarka xirfada lagu darayo barnaamijyadeena waxbarashada beddelka kale ah, waxaanu xaqiijineynaa in ardaydu qalin jabiyaan oo ay qorshe u haystaa mustaqbalkooda. Sidoo kale, waxaanu Akadeemiyada Dugsiga Dhexe sanad dugsiyeedka 2023-24 ka daahfuri doonaa Dugsiga Sare ee Boston Collaborative, kaas oo uu u oggolaan doono meelaynta muddada-gaaban ee ardayda u baahan

adeegyada dheeraadka ah ee fasallada 7-9 si ay ardaydaas wadada u sii hayaan sannadahaan muhiimka ah.

Imaanshaha Ardayga:

Si ay ardaydeenu u helaan ugana faa'iideystaan barnaamijka tacliinta xooggan ee tayeysan ee aanu dhiseyno, waa inay iskuulka joogaan oo ay xaadir ku yihiin si sidaas loo sameeyo. Inta aan kasoo kabaneyno aafada caabuqa, waxaan aragnay koror qaran oo ku yimid Maqnaanshaha Xad Dhaafka ah. Boston kama badqabto qaar kamid ah isbeddeladaan ee aan arkeyno qaran ahaan. Si gacan looga geysto maqnaanshaha maalinlaha iyo xad-dhaafka ah, waxaan sameynay dhowr maalgashi oo muhiim ah oo ay ka mid yihiin ku darista kormeerayaal dheeri ah soo xaadirista guud ahaan shabakadeena gobolka waxaana sameynay istiraatiijiyado oo ay ku jiraan deeqo dhiirigelin ah oo yaryar oo dugsiyada la siiyey sanad dugsiyeedkan la soo dhaafay si ay gacan uga geystaan diirad saarista kheyraadka si ardaydeena loogu soo celiyo dugsiga. 35-ta dugsi ee la siiyey deeqda yar ee soo xaadirista sanad dugsiyeedki SY22-23, 24 ka mid ah waxay dareemeen hoos u dhac ku yimid maqnaanshahoodi xad dhaafka ahaa laga bilaabo sanad dugsiyeedki SY21-22 ilaa SY22-23 (YTD), halka saddex ay isku heer ahaayeen. Intaan, 17 waxay lahaayeen hoos u dhac ah ugu yaraan 5% halka shan ay lahaayeen hoos u dhac 10% ah ama ka badan. Guud ahaan, maqnaanshaheena xad dhaafka ah wuxuu hoos uga soo dhacay 42% oo uu gaaray 37% kooxo hoosaadyada in si gaar ah loo xuso mudan waa dhanka waxbarashada gaarka ah (4% hoos u dhac ah), Ardayda madow (6% hoos u dhac ah), Latinx (4% hoos u dhac ah), iyo bartayaasha Ingiriisiga (5% hoos u dhac ah).

Taageerada Ardayga:

Sanad dugsiyeedkan la soo dhaafay wuxuu noo oggolaaday inaan faham qoto dheer u yeelano waxa baahiyaha shucuurta bulshada ardaydeenu ay tahay taasoo noo sahashay inaan abuurno Qeyb Taageero Arday oo si aad ah u dhammeystiran. Bishi Janaayo waxaan shaqaalaynay Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Horumarinta iyo Kor Uqaadista Ardayda. Jagadani waxay na siisay awood aan ku qaabeyno kuna bilowno hirgelinta barnaamij Dhexdhexaadinta Asaaga ah oo leh wakiillo ka kala socda iskuulo badan, labadaba heer dugsi sare iyo heer dugsi dhexe. Abuurista jagadani ee Qeybta Taageerada Ardayga waxay noo oggolaatay inaan xoojino oo aan sii qeexno iskaashigeenna aan la leenahay Xafiiska Duqa Magaalada ee Kor Uqaadista Ragga Madow. Dhacdooyinka la xusi karo sida booqashada HBCUSs ee aagga DMV ee fasixi gu'ga ee ku dhawaad 40 arday iyo martigelinta Shirka Awoodsiinta Dhallinyarada ee ku dhawaad 100 arday oo da' yar ayaa ah qaar ka mid ah shaqadii cajiibka ahayd ee la qabtay sannad dugsiyeedkii la soo dhaafay. Waxaan aad ugu faraxsanahay inaan ballaarino iskaashigan sanad dugsiyeedka soo socdo.

Sanad dugsiyeedka soo socdo waxaan sidoo kale ballaarineynaa qaar badan oo ka mid ah waaxaha Taageerada Ardayda si aan u waafajino qaab dhismeedka gobolka ee degmada. Waaxda Succeed Boston waxay ku dari doontaa sagaal garsoorka Bogsiinta Caddaalada/SAWS (Khabiirka Dugsiyo Badbaado iyo Soo Dhaweyn leh) ee gobolka iyo Agaasime Bogsiinta Caddaalada ah si ay u taageeraan shaqadan muhiimka ah. Waaxdeena Shaqada Bulshada dhexdeeda, waxaan ku darnay jagada Shaqada Bulshada SLIFE ee Degmada oo ay wehliso siddeed iyo toban jago dugsi oo shaqo bulsheed oo ku saleysan SLIFE si loo taageero caafimaadka maskaxda iyo baahiyaha shucuureed ee bulshada ee kuwa cusub iyo ardaydeena oo leh waxbarasho kala go' lahayn ama carqalad yar. Waaxda Fursadaha Dhallinyarada waxay ku dartay kormeerayaasha Soo Xaadirista (SOA) oo dheeri ah si loo xaqiijiyo inaan SOA ku leenahay gobol kasta. Waaxda Ciyaaraha Fudud ayaa ku dareysa Agaasimaha u Hogaansanaanta marka laga soo tago saddexda Iskuduwaayaasha Ciyaaraha Fudud ee gobolka Waaxda Adeegyada Caafimaadka ayaa iyadana ku dareysa seddex Iskuduwaayaasha Barnaamijka Kalkaalinta Caafimaadka ee gobolka. Jagooyinkaan oo dhan iyo ugu

dambeynti shaqaalaha la qoro waxay door muhiim ah ka ciyaaraan taageerida dhalinyaradeena ka baxsan fasalka si ay ugu guuleystaan fasalka iyo horumarinta xirfadaha bulshada ee nolosha looga baahan yahay.

Dhinac kale oo ay tahay in la xuso ayaa ah iskaashiga aan la leenahay Guddiga Caafimaadka Dadweynaha ee Boston si aan dhakhaatiir caafimaad oo maskaxeed oo dheeri ah iyo daryeelka xog ogaalka ee shoogga ugu keeno iskuuladeena baahiyaha sare u qabo. Iyadoo loo marayo iskaashiga aan la leenahay BPHC iyo hannaanka RFP, hay'adda Franciscan Children ayaa la doortay waxayna bixin doontaa kormeer, taageero shati bixin, taageero mushaar, waxayna gunno siin doontaa 22 dhakhaatiir daryeelka hore ah oo la geeyey 10 goobood oo dugsiyada BPS ah. Dugsiyada waxaa lagu xushay iyadoo la adeegsanayo Tusmada Fursadda, waxa kale oo la tixgeliyey ayaa ah iskuulada leh tirada ugu badan ee jawaabaha qalalaasaha ee ka yimid sanad dugsiyeedkan la soo dhaafay. Guud ahaan saddexdaan sano ee maalgelinta, ku dhawaad **900 oo arday oo dhigata dugsiyada BPS** ayaa la siin doonaa taageero caafimaad iyo wax kaqabasho ka socoto 22 dhakhaatiir oo la geeyey 10 iskuul oo cusub oo BPS ah.

Heerka II, waxaan faahfaahin ka bixin doonaa oo carrabaabi doonaa hirgelinta iyo isbeddelka qaabkeena shabakada gobolka, taas oo muhiim u ah istiraatiijiyaddeenna isbeddelka Degmada iyo in la hubiyo inay jirto taageero ku filan dhex ahaan iyo toos ahaanba iskuuladeena ee dhammaan aagagga si ay si wax ku ool ah u dabooli karaan baahiyaha kala duwan ee ay qabaan ardaydeena. Qaabka shabakada gobolka wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa dhammaan aagagga ururka, oo ay ku jiraan natiijooyinka ardaydeenna tacliinta.

HEERKA II: Maamulka iyo Hawlaha

Wuxuu kor u qaadaa barashada iyo koboca dhammaan ardayda iyo guusha dhammaan shaqaalaha isagoo hubinaya deegaan waxbarasho oo ammaan ah, hufan, oo wax ku ool ah, iyadoo la adeegsanayo kheyraad lagu hirgeliyo manhajka ku habboon, shaqaalaha, iyo jadwalka.

- 2-A Deegaanka
- 2-B Maareynta/Horumarinta Kheyraadka Aadanaha
- 2-C Nidaamyada Jadwaleynta iyo Maareynta Macluumaadka
- 2-D Sharciyada Anshaxa iyo Siyaasadaha
- 2-E Nidaamyada Maaliyadda

Toosinta Yoolka Kormeeraha Guud:

- Hagaajinta Wada-xiriirada Gudaha iyo Dibedda ee lala yeesho Qoysaska iyo Shaqaalaha
- Hagaajinta Hawlaha iyo Xaqiijinta Badbaadada Ardayga

	SI AAD AH WAX KU OOL AH
x	**WAX KU OOL AH**
	KOR USOO KACAYO
	SI HOOSE WAX KU OOL AH
	MA AHA WAX KU OOL

FAALOOYINKA:

Heerkan II wuxuu bixin doonaa tusaalooyin ku saabsan shaqadeenna la xiriirta

- Qaabdhismeedka Kooxda: Ku Xigeenada
- Qaabdhismeedka Kooxda: Qaabka Gobolka
- Qorsheynta Tas-hiilaadka
- Gaadiidka
- Xafiiska Maareynta Xaaladda Degdegga/Qorsheynta Badbaadada Dugsiga
- Nidaamyada Isgaarsiinta
- Qandaraasyada Shaqada

Nidaamyo adag iyo hawlgallo ayaa muhiim u ah urur weyn sida annaga oo kale inuu guuleysto waxayna sii tahay inay noqoto meesha ugu sareysa ee diiradda la saaro, iyadoo la fahamsan yahay in qaar badan oo ka mid ah nidaamyadeena aysan hadda buuxineynin filashooyinka ama heerka waax ee looga baahan yahay 48,000 ee arday ee aan u adeegno iyo in ka badan 12,000 ee shaqaalaha ah ee aan shaqaaleyno. Si aan u noqono degmo si heer sare ah u shaqeyneyso waa inaan fahamnaa isku tiirsanaanta nidaamyadeena iyo shaqadeena waana inaan iska kaashanaa guud ahaan ururkeena iskuulada iyo waaxaha si aan u gaarno hiigsiga ah inaan noqono degmo loo dhan yahay oo si dhab ugu adeegta baahiyaha ardaydeena, qoysaskeena, bulshada, iyo shaqaalaha.

QORSHAHA HORUMARINTA NIDAAMKA:

Shaqada Qorshaha Hagaajinta Nidaamsan (SIP) iyo warbixinada Golaha Dugsiyada Magaalo Weynta ee ku

saabsan Waxbarashada Gaarka, Gaadiidka, iyo Badbaadada Dugsiga, waxaan bilownay shaqada muhiimka ah ee is-weydaarsiga ee abuurista nidaamyada iyo nidaamyada dib-u-dhiska si aan u daboono baahiyaha ballaaran ee dugsiyada BPS. Kormeerka iyo iskula xisaabtanka shaqadaas iyo shaqo is-weydaarsigaas, waxay muhiim u noqon doontaa helitaanka jawaabaha iyo natiijooyinka aan u baahanahay. Waxaan soo saarnay boortofooliyada shaqada waxaana u xilsaarnay kabaallo muhiim ah shaqadaas si aan u xaqiijino hirgelinta 1-5 sano ee soo socdo oo laga qabto aagaga muhiimka ah sida: Badbaadada Dugsiga iyo Ardayga, Gaadiidka, Tas-hiilaadka, iyo Raasamaalka Aadanaha haddii dhowr laga xuso.

Aag kasta wuxuu leeyahay koox is-weydaarsi shaqo oo leh qaab dhismeed urur oo cad oo buuxinayo isla jaanqaadka si wax looga qabto caqabadaha adag iyo kuwa isku xiran oo leh filashooyinka iyo qulqulka cad ee macluumaadka. Koox kasta iyo waaxyahooda ay khuseyso waxay sidoo kale soo saartay cabbiro lagula socdo hirgelinta. Inta aan ka hirgelineyno, waa inaan la soconaa shaqada anagoo adeegsaneyna Tilmaamayaasha Waxqabadka Muhiimka ah ee noo oggolaanaya inaan fahamno: *Ma sameynay wixi aan dhahnay? Si intee le'eg ayaan u sameynay? Ma u sameysay wax isbedel ah carruurta? Sideese ku ogaaneynaa?*

Shaqada qorshaha SIP waa mid weyn oo horumarka shaqadeena iyo natiijooyinka ardayga ee la taaban karo waa inay ahaadaan cabbirka guusha. Arrimahaan kuma xallin karno habeen gudihiis waana inaan xaqiijino in leenahay aasaas adag oo aan ku dhisno shaqada. Taasi waxay ahayd diiradda wadajirka ah ee sannadkan – dhisidda aasaaskeena.

Qaab-dhismeedyada Ururka iyo Gobolka:

Laga bilaabo Shaxda Ururka, Waxaan dib u qaabeeyey kooxdeena Degmada iyo hogaanka oo leh seddex ku xigeen oo kormeerayaal guud ah oo taageeraya aagaga gaarka ah ee shaqada: Tacliinta, Howlgallada, iyo Sinnaanta, Qoyska iyo Horumarinta Bulshada. Ku Xigeenada, oo ay wehliyaan Madaxeyga Shaqaalaha La Taliyaasha Sare, waxay si dhow igala shaqeeyaan inaan mudnaan siiyo, maareeyo oona fuliyo shaqada. Madaxa Shaqaalaheena, Rochelle Nwosu, waa gacanteyda midig. Waxay kala wadaa hawlaha maalinlaha ah ee iga caawinaya sidii aan ula socon lahaa oo aan u maareyn lahaa waxyaabaha markay soo baxaan. La Taliyaasheena Sare waxay si dhow ula shaqeeyaan Madaxa Shaqaalaha si ay si firfircoon u maareeyaan una fuliyaan mashaariicda waaweyn ama qeybaha shaqada gaar ahaan meelaha mudnaanta la siinayo. Qaab-dhismeedkan cusub wuxuu noo sahlayaa joogteynta iyo iskula xisaabtanka siyaabo aanan horay u soo dhicin.

Marka laga soo tago shaxda ururka, waxaan sii wadnay qiimeynta iyo maalgashiga annaga oo adeegsanayna talooyinka ka imaanaya hoggaamiyeyaasha dugsiga iyo xiriiriyaasha qaabeynteena gobolka. Mid kasta oo ka mid ah sagaalka koox ee gobolka wuxuu si wareegto ah uga shaqeeyaa xafiiska dhexe. Kooxaha gobolku waxay u shaqeeyaan si madaxbanaan oo xaaladaha qaarkoodna waxay u shaqeeyaan si saddex-saddex ruux ah si ay u qiimeeyaan oo wax uga qabtaan caqabadaha iyo baahiyaha iskuulada gobol kasta iyagoo isla mar ahaantaana joogteynaya xiriir adag oo ay la sameynayaan kooxda dhexe wixi taageero ah.

Gobol kasta waxaa hogaamiya Kormeeraha Guud ee Dugsiga Gobolka kaasoo mas'uul ka ah 12-15 iskuul. Kormeerayaasha guud ee dugsiyada waxay adeegsadaan wareeg hagaajin oo joogta ah si ay dib u eegis ugu sameeyaan xogta dugsiga ku saleysan kadibna waxay bartilmaameedsadaan taageerooyinka hoggaamiyaasha dugsiyada halki kobcin ama taageero looga baahan yahay. Muddo gaaban gudaheed waxaan aragnay jawaab celin wanaagsan (bogga bandhigga 5aad) oo aan ka helnay hoggaamiyaasheena dugsiga. Tusaale ahaan waxaan ka soo kacnay 20% bishi May ee 2021 ilaa ku dhawaad 70% bishi Maarso ee 2023 ee dhinaca ku

qanacsanaanta jawaabta xafiiska degmada. Qaab-dhismeed isku mid ah, kooxaha gobolka sanadka soo socda ayaa la ballaariyey waxaana ka mid ah:

- Hogaamiyaha Fulinta
- Khabiirka Kaqeybgelinta Qoyska
- Khabiirka Sinnaanta
- Degmo Shaqaalaha Bulshada
- Kaaliyaha Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah
- Horumarka raasumaalka aadanaha
- Tababare Tacliinta Loo Siman Yahay
- La Dardargeliyay Horumarinta & Maareeyaha Weydiinta
- Kormeerayaasha Imaanshaha
- U Hogaansanaanta Luuqadaha Badan iyo Taageerada Waxbarashada
- Khabiirka Bogsiinta Cadaaladda

Degmo ahaan baaxadeena waa inaan u shaqeynaa sidii hal koox, laakiin sidoo kale aan aqoonsanno baahiyaha kala duwan ee ay qabaan bulshooyinka iskuulkeena. Labadaba qaab dhismeedka ururkeena iyo qaabka gobolka waxay muhiim u yihiin aasaaska shaqadeena. Dhisidda koox xooggan iyo lahaanshaha doorar cad iyo mas'uuliyado waxay noo oggolaaneysaa inaan si cad u la xisaabtanno shaqada oo ay noqoto mid natiijo la hago.

Qandaraasyada Shaqada:

Intaa waxaa dheer, dhisidda shaqaalo kala duwan oo karti leh oo u arka dugsiyada BPS goob laga shaqeeyo, lagu horumariyo, laguna sii wado u adeegidda ardaydeena iyo qoysaskeena ayaa ka dhigeysa qandaraasyada shaqada iyo mushaaraadka kuwa tartan ah oo hadda ah inay muhiim tahay. Intii lagu jiray sannadkan la soo dhaafay, dhammaan 18-ka qandaraas ee aan la galnay ururradeenna ayaa aad u fiicnaa, oo qaarkood gaarayaan ilaa 3 sano. Waxaan ku faanayaa in sanadkeygi koowaad, dhammaan qandaraasyadeena ay hadda yihiin kuwo cusbooneysiisan, anigoo kala shaqeynayo Xafiiska Xiriirada Shaqada, waxaan soo saarnay koox wada xaajoodyo wada shaqeyn gudaha ah si aan u hubinno inaan qorsheyneyno oo aan diyaar u nahay wada xaajoodyada mustaqbalka. Waxaanu sii wadeynaa inaan dhisno cilaaqaad xooggan iyo wada shaqeyn aan la yeelano ururadeena inay sameeyaan shaqada muhiimka ah ee looga baahan yahay mustaqbalka dugsiyada BPS. Mid kasta oo ka mid ah ururadaan wuxuu matalaa shaqaalaha sida hagar la'aanta ah ula soo shaqeeyey hoggaamiyeyaasha iskuulkeenna inta ay socotay aafadi caabuqa, iyagoo u samaynaya wax kasta oo loo baahnaa, ardaydeena iyo qoysaskeenna. Waxaan hadda leenahay jadwal shaqo oo noo oggolaanaya sannad kasta inaan diiradda saarno wada xaajoodyada dhowr qaybood markiiba oo aan ka dhigno Degmadeenna mid tartan ah iyo meel ay shaqaaluhu ku dareemaan in la qadariyo. Marka qandaraasyada aanan laga dhigin kuwo hadda ah, gaar ahaan muddo dhawr sano ah, shaqaaluhu ma dareemaan shaqaaluhu ma dareemaan ixtiraam ama qadarin. Marka laga soo tago xaqiijinta in dhammaan qandaraasyadeena ay yihiin kuwo cusbooneysiisan waxaan ka shaqeyneynaa inaan yareyno oo aan xallino cabashooyinka taagan oo aan tababar ku siino shaqaalaha si aan u xaqiijino inay leeyihiin xirfado ay ku baabi'iyaan eexda iyo takoorka goobta shaqada.

Tas-hiilaadka Dugsiga iyo Degmada:

Qeyb kale oo muhiim ah oo ka mid ah aasaaskeena ayaa ah xaqiijinta in ardaydeena oo dhami ay haystaan

meelo aamin ah, nadiif ah, ifaya oo dhiirigelin u leh inay wax ku bartaan.

Qaar badan oo ka mid ah tas-hiilaadkeena waxay aad ugu baahi qabaan dayactiro waaweyn ama dib u dayactiro dhammeystiran. Iyada oo uu hogaaminayo Dr. Sam Depina, Kuxigeenka Kormeeraha Guud ee Howlgalada, degmadu waxay ku jirtaa marxaladaha ugu dambeeya ee horumarka laba qalab oo aad u muhiim ah oo aasaasi ah oo noo oggolaanaya inaan abuurno qorshe tas-hiilaad oo muddo dheer ah.

Marka la gaaro dhammaadka xagaaga, waxaan lahaan doonaa Qiimeynta Xaaladdaha Tas-hiilaadka (FCA) oo dhammeystiran. Waxaan hadda adeegsanaa dhaashboodhka dhismaha oo ay sameeyeen kooxdeena tas-hiilaadka ee gudaha si loo fahmo xaaladaha ay ku sugan yihiin dhismayaasheena. Iyadoo dhaashboodhku waxtar leeyahay, qiimeynta FCA waa u kuurgal qoto dheer oo ka socota qandaraasle dibedda oo ku saabsan xaaladda dhismayaasheena. Waxaana sidoo kale u adeegsan doonnaa xogta FCA - annaga oo la kaashanayna Capital Predictor and Asset Essentials - inaan ku soo saarno Qorshaha Kaabayaasha oo 10 sano ah. Tani waxay xisaabta ku dari doontaa da'da, cimriga waxtarka, negaanshaha (cagaaran) iyo mudnaanta qeybaha kala duwan ee dayactirka si wax looga qabto baahiyaha kaabayaasha muhiimka ah.

Marka la gaaro dhammaadka sanadka kalandarka, waxaan sidoo kale dhammeystiri doonaa daraasadda naqshada preK-6 / 7-12. Marka la gaaro dhammaadka hannaankan geedi socodka, waxaan lahaan doonnaa qeexitaanno waxbarasho, heerar dhisme, iyo xeerarka mudnaanta leh oo noo suuragelin doona inaan dardargelino xawaaraha dhismaha dugsiga iyo dib u dayactirada si arday kasta oo ka tirsan Dugsiyada Dadweynaha Boston uu wax ugu baran karo dhisme ammaan ah, caafimaad qaba, adkeysi leh, oo dhiirigeliyo.

Qeybaha qiimeynta FCA iyo Daraasada Naqshada waxay gacan ka geysan doonaan xogsiinta qorshaha tas-hiilaadka degmada ee muddada fog. Qorshaha tas-hiilaadka ee degmada oo dhan wuxuu ka caawin doonaa degmada inay mudnaanta siiso mashaariicda raasamaalka oo ay u sheegto go'aannada ku saabsan isku-darka suurtagalka ah, xiritaanada, dhismayaasha cusub, iyo dib u dayactirada waaweyn ee dhismayaasha dugsiga ee degmada oo dhan. Waxaan rajeyneynaa inaan idinla wadaagno qorshahan horraanta sanadka soo socda.

Badbaadada Dugsiga:

Qeyb kale oo muhiim ah oo ka mid ah tas-hiilaadkeena iyo hawlgalladeena ayaa ah xaqiijinta in dhismayaasha shaqaalaheena iyo ardaydeena ay yihiin kuwo ammaan ah, labadaba jir ahaan iyo dareen ahaanba. Golaha Dugsiyada Magaalo Weynta (CGSC) waxay na siiyeen dib u eegis dhameystiran iyo talooyin ku saabsan badbaadada dugsiga iyo ardayga. Waxaan bilownay inaan hirgelinno qaar badan oo ka mid ah talooyinkaas, anagoo ku bilaabeyna abuurista iyo qaabeynta Xafiiska Maareynta Xaaladaha Degdegga. Bilowgi sanad dugsiyeedki 22-23, waxaan haysanay wax ka yar kala bar Khabiiradeena Badbaadada oo heegan ah, hadda waxaan buuxinay dhammaan jagooyinka Khabiirada Badbaadada waxaana tababar cusub u sameynay khubaradeena iyadoo diiradda la saarayo dhaqamada xog ogaalka ah ee dejinta xaaladda iyo shoogga. Marka laga yimaado khabiiradeena badbaadada waxaanu abuurnay Isuduwayaasha Iskuxirka Bulshada ee la shaqeyn doona hoggaamiyeyaasha dugsiga iyo bulshada si ay u bixiyaan diiradda wax ka qabasho firfircoon oo ku saabsan helitaanka kheyraadka iyo taageerada ku habboon baahiyaha u gaarka ah ardayga. Waxa ka dhaca xaafadaheena waxaa inta badan la keenaa dugsiyadeena. Isku-duwayaashu waxay door muhiim ah ka ciyaari doonaan ogaanshaha dhalinyaradeena iyo ku taageerida gudaha iyo banaanka dugsiga.

Kooxdeena qaabilsan wada xiriirada waxay soo shaqaaleysiiyeen khabiir qaabilsan wada xiriirada gudah ah

oo soo saaray borotokoolo loogu talagalay dugsiyada inay ku fahmaan marki ay tahay inay la xiriiraan qoysaska, gaar ahaan wixi ku saabsan wax kasta oo la xiriira badbaadada dugsiga. Waxaan tababar siinay hogaamiyaasheena dugsiyada iyo maamulayaasha kale ee dugsiyada waxaana hadda jira faham cad, tusaalooyin iyo isgaarsiin la raaco marka dhacdo ay ka dhacdo dugsi.

Gaadiidka:

Bixinta gaadiid ammaan ah, la isku halleyn karo oo watigii loogu talagalay ku yimaada waxay muhiim u tahay xaqiijinta in ardaydeena ay tagi karaan waxbarashadooda. Waxaan galeynaa sanad dugsiyeedka 2023-2024 meel aad uga duwan hal sano ka hor anagoo adeegsaneyno adeegeena gaadiidka baska ee jaallaha ah. Degmadu waxay si buuxdo u keentay darawaliin bas marki ugu horreysay tan iyo kahor caabuqa COVID-19. Iyadoo lala shaqeynayo Transdev, degmadu waxay soo shaqaaleysiisey in ka badan 200 oo darawallo basas ah tan iyo bishii Maajo 2022, oo ay ku jiraan 139 kuwaas oo lasiiyay tababar CDL oo lacag lagu qaadanayo (waa hindise cusub oo aysan horay u bixin degmadu). Degmadu waxay sii wadeysaa la shaqeynta Transdev si ay tababar joogto ah oo CDL ah u siiso shaqaalaha cusub ee la qoray waxayna haysataa darawallo dheeri ah oo safka ugu jira oo tababarka dhammaystiri doona xagaagan, si aan u bilowno sanad dugsiyeed diyaar u ah inaan gaarno himilooyinkeena gaadiidka. Waxaan qandaraas cusub kula jirnaa Transdev kaasoo ku dhisan horumarka aan sameynay oo markii ugu horreysayna wuxuu leeyahay dhiirigelin dhaqaale oo macno leh oo ku saabsan waxqabad la hagaajiyey iyo waxyeelada la geysto ee waxqabad la'aanta, la waafajiyay yoolalka gaadiidka ku saleysan ardayda. Waxaan dib u habeyn ku sameynay nidaamkeena daboolista kormeerka baska si dhammaan basaska qaada ardayda naafada ah ay u lahaadaan ugu yaraan hal kormeere oo gaadiidka saaran. Waxaan sii wadeynaa inaanu horumar weyn ka sameyno xagga shaqaaleysiinta kormeerayaasha baska si qoysaska ardayda dhigata waxbarashada gaarka ah aysan ula kulmin carqaladeynta adeegga ee dhacday sanadkii la soo dhaafay. Degmadu waxay soo shaqaaleysiisey 175 kormeerayaal bas inti lagu jiray sanad dugsiyeedki SY22-23 waxaana hadda safka ugu jira 105 kormeerayaal oo cusub. Waxaan rajeyneynaa laga bilaabo sanad dugsiyeedka 2023-24 in kabadan 700 oo kormeerayaal ah waxaana sii wadi doonnaa ka shaqeynta qoritaanka, shaqaaleysiinta, iyo tababarida kormeerayaasha baska oo dheeri ah. Marka la eego xogta laga helay sanadki la soo dhaafay, ka nidaam ahaan waxaan hagaajinay ku qabashada Waqtiga Loogu Talagalay Waxqabadka (OTP) waxaana xallinay boqolkiiba qeyb weyn xogta GPS ee maqan inta uu sanadku sii socday. Dhinaca Khadka Caawinta Gaadiidka, degmadu waxay ku dartay “kormeerayaasha basaska” safka khadka caawinta ee loogu talagalay qoysaska ardayda naafada ee sanad dugsiyeedka SY22-23, marka laga soo tago shaqaalaheena kuhadla luqadaha badan ee hadda jira, si loo wanaajiyo wada xiriirada lala yeelanayo qoysaska. Waqtiyada sugitaanka ee qoysaska waxay celcelis ahaan ahaayeen 2 daqiiqo kayar, oo ah bartilmaameedkeena, guud ahaan safafka Kormeerayaasha Af-Ingiriisiga iyo Baska ee Janaayo ilaa Juun 2023. Waxaan sii wadeynaa ka shaqeynta yareynta waqtiyada sugitaanka ee safka loo qoondeeyey luqadda Af-Isbaanishka, halkaasoo waqtiyada sugitaanka ay celcelis ahaan ahaayeen 3:30 daqiiqo laga bilaabo Janaayo ilaa Juun 2023. Inkastoo aan sanadka ku dhammeysanay ka hoose 95% waqtiga sugitaanka ee OTP ee ku jira Qorshaheena Hagaajinta Nidaamsan (SIP), waxaan sameynay horumar la taaban karo oo hawlgal ah si aan u hagaajino ku qabashada waxqabadka waqtigi loogu talagalay ee bil kasta, hubinta in dhammaan marinnada la daboolo maalin kasta, qoysaskana la siiyo isgaarsiinta waqtiga-dhabta ah ee ku saabsan dib-u-dhac kasta ama caqabadaha adeegga iyadoo loo marayo Khadka Caawinta Gaadiidka.

HEERKA III: Ka Qaybgalinta Qoyska iyo Bulshada

Waxay kor u qaadeysaa barashada iyo koritaanka dhammaan ardayda iyo guusha dhammaan shaqaalaha iyada oo loo marayo iskaashi wax ku ool ah oo lala yeesho qoysaska, ururada bulshada, iyo saamileyda kale ee taageera howlgalka dugsiga iyo degmada.

- 3-A Ka Qaybgalinta
- 3-B Wadaagista Mas'uuliyadda
- 3-C Wada-xiriirada
- 3-D Walaacyada Qoyska

Toosinta Yoolka Kormeeraha Guud:

- Horumarinta Dhaqanka Qoyska iyo Ka qaybgalka Bulshada ee Saxda ah
- Hagaajinta Wada-xiriirada Gudaha iyo Dibedda ee lala yeesho Qoysaska iyo Shaqaalaha

	SI AAD AH WAX KU OOL AH
x	**WAX KU OOL AH**
	KOR USOO KACAYO
	SI HOOSE WAX KU OOL AH
	MA AHA WAX KU OOL

FAALOOYINKA:

Heerkan III wuxuu bixin doonaa tusaalooyin ku saabsan shaqadeenna la xiriirta:

- Dib u qaabeynta: Kordhinta Sinaanta, Horumarinta Qoyska iyo Bulshada
- Hagaajinta Rugta Golaha Dugsiga
- Khadka Caawinta Qoyska BPS
- Ballaarinta Kormeerka Waalidka
- Iskaashiyada Ganacsiga

Bilawgii gelitaanka sanadkaan, waxaan ogaaday in dhammaan kooxaha saamileyda ee aan la kulmay - qoysaska, ardeyda, shuraakada bulshada, hay'adaha kheyriga iyo bulshada ganacsiga ay dareemeen inay ka go'een dugsiyada BPS waxayna ku jahwareereen ineysan haysan goob lagu dhageysto ama lagu fahmo si ay si micna lehna ula hawlgalaan. Xaqiiqdaan gaarka ahi ee aan dareemay in ay aad uga duwan tahay dugsiyadi BPS ee aan garanayey 7 sano ka hor iyo qiyaasteyda ah in ay uga sii dartay iscasilaada joogtada ah ee hoggaanka iyo shaqaalaha ee Degmada iyo Aafada Caabuqa. Intaa waxaa sii dheer, goobaha shaqada ee muhiimka ah sida kaqeybgalka Qoyska iyo Bulshada, Degmadeenu waxay ahayd mid shaqaale yar ay joogaan heer Degmo iyo heer dugsi labaduba.

<u>Kor Uqaadista Sinnaanta, Horumarinta Qoska iyo Bulshada iyo Goleyaasha Rugta Dugsiga:</u>

Waxan si adag u aaminsanahay, sida hogaanka kooxdeenuba aaminsantahy, in qoysaskeenu yihiin shuraakadeena ugu weyn shaqadan, waana inaan kagudubnaa qaabka ku lug lahaanshaha qoyska iyo bulshada una gudubnaa kaqeybgal dhab ah o mid ah. Iyadoo qeyb ka ah dib uhabeynteena in la muujiyo muhiimadda in laga dhigo shaqadan mid loo simanyahay ururka, waxaan kor uqaaday qeybta Sinnaanta,

Horumarinta Qoyska iyo Bulshada waxaana abuuray jagada Ku Xigeenka Kormeeraha Guud oo ay hogaamiso Dr. Ana Tavares. Inta ay Dr. Tavares hoggaanka haysay, waxaan kordhinay taageerada Goleyaasha Rugta Dugsiyadeena–inagoo gobal kasta ku kordhineyno xiriiriye oo, bilaabeynana sanadka xiga, waxaan bixin doonaa tababar loo igmaday shaqaalaha dugsiga iyo qoysaska si ay ufahmaan doorka muhiimka ee Goleyaasha Rugta Dugsiyadeena iyo iskaashiga loo baahanyahy inaan ku taageerno ardeydeena. Dhaqan ahaan, tababarkani wuxuu ahaa mid iskaa ah taasina waxay keentay joogteyn la'aanta xagga kudhaqanka iyo tayada goleheena SSC. Inagoo lashaqeynayno Goleyaasheena Waalidiinta ee Degmada oo dhan iyo Guddiga Hoggaaminta Wadajirka ah, waxaa cadaatay inaan ubaahanahay inaan kusameyno dib uhabeyn si qoto dheerna aan u maalgelino tababarka iyo taageeridda hoggaamiyaasha dugsiyada iyo waalidiinta si golaha SSC dhab ahaantii ay u noqon karto meelaha ay ka-qeybgalka waalidka iyo qoyska ay si buuxda uga dhacaan.

Wada Xiriirka Qoyska iyo Khadka Caawinta ee BPS:

Si wax looga qabto welwelka laxariira wada xiriirka ay waalidiinta iyo qoysasku nala wadaageen, iyo dadaalada socda ee lagu dhisaayo kalsoonida qoysaska BPS, waxaan sidoo kale hirgelinay oon hagaajiney hab maamuusyo iyo hab raacyo aan kula xiriirineyno qoysaska iyo bulshada dugsiga macluumaadka muhiimka ah sida ugu dhaqsiyaha badan, uguna saxsan, uguna macquulsan uguna gudbineyno luuqadahooda hooyo. Kooxda wada xiriirka ee la ballaariyey ayaa si dhow ula shaqeysa hogaanka kooxdeyda, hogaamiyayaasha dugsiga iyo shuraakada magaaladeena si ay degdeg ah u gaarsiiyaan qoysaskeena mowduucyo kala duwan oo ay kamid tahay wada xiriirka dhacdada. Anagoo siineyno waalidiinta iyo daryeelayaashu habab isgaarsiineed oo joogto ah laguna kalsoonaan karo, oo ay kamid yihiin wicitaanada mashiinka, iimaylada, farriimaha qoraalka iyo ku warsiinta baraha bulshada, waxaan kordhin doonaa kalsoonida ay ku qabaan degmada iyo ballanqaadkeena daahfurnaanta. Sanadkan waxaan hab maamuusyo isgaarsiineed oo cadcad u soo saarnay dugsiyadeena si macluumaadka si degdeg ah lagula wadaago qoysaska. Waan sii wadi doonaa inaan dhisno oo aan horumarino kooxdeena wada xiriirada si aan u abaabuli karno ugana jawaabno xaalad kasta.

Intaa waxaa dheer, waxaan sidoo kale daahfurnay Khadka Caawinta ee BPS sanadkii tagey xarunta adeegga macaamiisha ahaan si aan u garab istaagno qoysaska/mas'uuliyiinta raadinaya macluumaad ku saabsan degmada. Si lamid ah nidaamka 311 ee Hoolka Magaalada, Khadka Caawinta ayaa la furay Maajo, 2022, waxaana lagu taageeray 24,016 xubnood oo ka tirsan Bulshada BPS oo ay kujiraan waalidiinta, dugsiyada, iyo shuraakada bulshada iyo waaxyada hawlgallada si ay u helaan macluumaad, uhelaan ilaha, u sahmiyaan caqabadaha, wax uga qabtaan walaacyada una taageeraan saameynta weyn ee kaqeybgalada sida shirarka degmada oo dhan ama xaaladaha degdega ah ee dugsiga.

Khadka caawinta wuxuu maareeyay in ka badan 20 kun taabasho si uu u taageero baahiyaha Bulshada BPS (waalidiinta, barayaasha, shaqaalaha dugsiga/hogaamiyayaasha, shuraakada bulshada iyo muwaadiniinta ay khuseyseyso). Tani waa sii kala qeybinta:

- 14,371 soo wicitaanada gudaha ah / 7,899 wicitaanada dibadda ah si loo taageero weydiimaha gudaha ah, codsiyada taageerada, walaacyada iyo cabashooyinka
- 1,592 iimaylo
- 154 imaansho (si muxaafadeysan, raadraaca imaanshaha wuxuu bilawday Diseembar 2022
- Fursadaha mustaqbalka waxaa kamid ah horumarinta habka wada sheekeysiga

Khadka caawinta wuxuu shaqadiisa uqeexaa 4 Heerar oo Adeeg:

- Heerka 1-aad (uusan raadraacin FreshDesk)- Taageero Guud oo aan ubaahneyn kaalmo farsamo oo qoto dheer (macluumaad sahmin guud, gudbin, sahminta kheyraadka, iwm). Waxay kamid noqon doonaan koodhka raadraaca sanad dugsiyeedkan si loo helo xog wanaagsan oo kusalaysan noocyada wicitaanada guud.
- Heerk 2-aad - Caawinaada Farsamo ee loo baahanyahay (uu raadraaco Freshdesk) - Taageerada shaqooyinka sida foomamka, sida si wanaagsan ee loogu xirnaan karo dugsiyada, iwm.) 1,975 wicitaano ayaa soo galaya qeybtan
- Heerka 3-aad - Walaacyada/Cabashooyinka. Qeybtani waxaa ka mid ah 525 cabasho.
- Heerka 4-aad - Taageero Degmo oo ballaaran (wicitaanka gudaha/dibedda marki wax muhiim ah ay dhacaan si looga jawaabo su'aalaha bulshada)
    - Wuxuu ku lug leeyahay taageerada wicitaanka gudaha/dibedda, kulanka hawlgelinta, soo xaadirista dhacdada, iwm.
    - Wuxuu awood weyn siiyaa iskuulada marki ay filayaan wicitaano baaxad leh
    - wuxuu taageeri karaa wada xiriirada maareynta xaaladaha degdegga ah markii loo baahdo
    - La shaqeyn karaa waaxaha kale ama dadaallada lagu horumarinayo wada xiriirada (sida Green New Deal (Heshiiska Cusub ee Cagaaran)

Furan maalmaha dhammaadka toddobaadka laga bilaabo saacadda 8:30 am ilaa 5:00 pm, shaqaalaha Khadka Caawinta waxay maareeyaan su'aalo ballaaran oo kala duwan. Mawduuca waa uu kala gedisan yahay sanad dugsiyeedka oo dhan laakiin dhinacyada ugu waaweyn ee taageerada waa:

- Waxbarashada Gaarka (sahminta IEP, Qiimeynada, Hannaanka sahminta)
- Gaadiidka (La socodka/Walaacyada Albaab-ka-Albaab, Wicitaanada xiisadda kacsan)
- Su'aalaha/walaacyada dugsiga ku saleysan (sahayda dugsi ku noqoshada, sida hawlaha loogu qabto dugsiga, taageerada dhacdada/xeerka anshaxa/badbaadada/xoog sheegashada)
- Taageerada Kheyraadka Qoyska (P-EBT/SNAP, guriyeynta, helitaanka la awoodi karo ee baahiyaha qoyska)
- Xagaaga (oggolaanshiyaasha shaqada, barnaamij iska qorka, fahamka fursadaha kala duwan ee Xagaaga)
- Hannaanka Diiwaangelinta taageerada Adeegyada Soo Dhaweynta iyo Gudbinta ee la dheereeyey (fahmidda barnaamijka Discover BPS, sida loo sahmiyo hannaanka, imtixaanka dugsiyada, UPK, xilliyada waqtiga uqalmitaanka, iwm.)
- Waxaanu ka shaqeyneynaa dib u cabbiridda nidaamka si uu noo siiyo xog dheeraad oo gaar ah oo ku saabsan dariiqa ay martay arrin kasto

Waqti xaadirkan, Khadka caawinta waxaa ku jira Agaasimaha Adeegga Deegaanka kaasoo hoggaamiya shaqaale shan takhasusle ah oo ku hadla lix luqadood oo matalaya degmada oo ay ku jiraan: Af-Faransiis, Af-Carabi, Af-Cape Verdean Creole, Af-Burtaqiis, Af-Soomaali, iyo Af-Isbaanish. Khadka caawinta waxaa la rajaynayaa in lagu daro laba takhasusle toddobaadyada soo socda iyo Maareeyaha BPS. Musharixiinta hoggaaminaya waxay ku hadlaan Af-Isbaanish iyo Af-Haitian Kreyol si loogu daro awoodda luqadeed ee Khadka Caawinta. Deyrta dhexdeeda, Khadka caawinta waxaa la rajaynayaa in lagu daro afar shaqaale oo dheeraad ah si ay u daboolaan tirada wicitaanada

Khadka caawinta wuxuu adeegsadaa softiweerka FreshDesk, kaas oo u ogalaanayo shaqaalaha iney si wax ku ool ah u maareeyaan oo ay raadraacaan arrimaha iyo weydiimaha marka la xalinayo. Waxaan sii wadi doonaa inaan dhisno guusha Khadka Caawinta qoyska, laakiin waxaan aragnay kuqanacsanaanta weyn ee qoysaska iney helaan “dukaameysi hal meel ah” oo ay aadaan iyadoo ayna ugu wacantahay nidaamka

raadraaca ayaa la arkay koror ku yimid ka jawaabidda codsiyadooda. Qaar ka mid ah horumarinada la tixgelinayo waxaa ka mid ah tijaabinta madalada shabakada FreshDesk si loogu ogalaado dugsiyada iney adeegsadaan awooda nidaamkeena oo lagu raadraaci karo walaacyada qoysaska, su'aalaha iyo macluumaad wadaagista afeyneyso barnaamijka FreshDesk oo kusaleysan wixii aan soo baranay si aan u eegno horumarinta dhaashboodhka dadweynaha. Waxaa kale oo ka mid noqon kara kaqeybgalka fursadaha wacyi gelinta la balaariyay (sida bandhigyada kheyraadka, dhacdooyinka, shirarka, iwm.) si aan ugu bixino adeegga goobta ay qoysasku nooga baahan yihiin anagoo lahowl galeyna bulsho dugsiyeedkooda iyo iney noo ogalaato inaan u horumarino saldhig aqooneedka bulshadeena si aan ula wadaagno arimaha ku saabsan macluumaadka bulshadeena guud ahaan ay ka raadiso taageero iyo/ama bulshada dugsigu jeceshahay iney wadaagaan.

Latalinta Waalidka:

Marka laga soo tago xaqiijinta in qoysaskeena helaan meelo ay kasoo wacaan kuna weydiiyaan su'aalo, waxaa kale oo aan rabnaa inaan taageerno oo aan kordhino ku lug lahaansha dugsiyadeena. Waxaan sii deyna RFP si aan u aqoonsano iskaashi bulsheed oo a wood u leh iney horumariso ama kafaa'iideysato sameynta barnaamijka Latalinta Waalidka oo diyaar ah kaas oo dhisaya kalsoonida iyo xirfadaha waalidka labaduba si ay u noqdaan kuwo ku firfircoon nolosha dugsiyada carruurtooda iyo iney sii abuurto xaalado ay dugsiyadu ku muujinayaan doorka qiiimaha leh ee waalidiinta ka ciyaaraan ka ahan shuraakada bulsho dugsiyeedkooda iyo waxbarashada ardaydooda. Waxan fileynaa inaan ku abaal marino qandaraas dhamaadka xagaaga la-hawlgalkeenana wuxuu bilaaban doonaa sanad dugsiyeedka soo socda.

Marki laga soo tago barnaamijkeena latalinta waalidka waxaan sidoo kale si joogta ah ula kulmay in badan oo ka mid ah kooxda waalidiinteena si aan si toos ah u dhagaysto qoysaskeena. Sannadkan waxaan marar badan la kulmay Golaha La-talinta Kaqaybgalka Bulshada, St Stephen, Kooxda Hoggaanka Waalidka, Golaha Waalidka Magaaladadhan, SPEDPAC iyo DELAC. Cilaaqaad xooggan oo lala yeesho qoysaskeena waxay muhiim u tahay guusha ardaydeena. Waxay ii tahay mudnaan inaan ku dhiso shaqada aan qabannay oo aan soo saaro hawlgelin ka qoto dheer oo dhab ah oo lala yeesho qoysaskeena sanadada soo socdo.

Iskaashiyada Ganacsiga:

Ugu dambeyntiina, waxaanu horumarineynaa iskaashi aan la yeelano Rugta Ganacsiga ee Weyn ee Boston si aan kor ugu qaadno heerka iskaashiga ee ka dhexeeya bulshada ganacsiga iyo dugsiyada BPS. Waxaan hadda daraaseyneynaa tusaalooyinka shaqadan dalka oo dhan si aanu u hirgelino nidaam ka jiro dugsiyada BPS halkaas oo la-hawlgalayaasha shaqada ay awood u leeyihiin inay iskuuladeena dhaqaale ahaan iyo horumar ahaan ku taageeraan qaabab la jaan qaadayo hiigsiyada shirkadahooda una oggolaanaya ardayda BPS inay helaan kheyraad shaqo oo ay ku jiraan fursadaha waxbarasho ee ku saleysan shaqada. Waxaan haysanaa ganacsiyo cajiib ah oo tiro badan iyo waaxo shaqo halkan gudaha Boston. Qaar badan oo ka mid ah waxay rabaan inay taageeraan oo ay arkaan ardaydeena oo kobcaya waxayna fahamsan yihiin qiimaha ay leedahay dhisidda garab-qabashada kartidooda. Tani waa mid guul iyo guul u ah labada dhinacba waxaana ku faraxsanahay inaan arko shaqadan oo sii koreysa sanadka soo socdo.

Heerka IV: Dhaqanka Xirfadeed

Wuxuu dallacsiiyaa guusha ardayda oo dhan isagoo kobcinaya oo sii wata dhaqanka dugsiga ee dhaqanka ka tarjumidda, filashooyinka sare, iyo waxbarashada joogtada ah ee shaqaalaha.

- 4-A Balanqaadka Heerarka Sare
- 4-B Aqoonta Dhaqanka
- 4-C Wada Xiriirada
- 4-D Waxbarashada Joogtada Ah

Toosinta Yoolka Kormeeraha Guud:

- Kordhinta La Xisaabtanka Xafiiska Dhexe iyo Dugsiyadeena labadaba

	SI AAD AH WAX KU OOL AH
x	**WAX KU OOL AH**
	KOR USOO KACAYO
	SI HOOSE WAX KU OOL AH
	MA AHA WAX KU OOL

FAALOOYINKA:
Heerkan IV wuxuu bixin doonaa tusaalooyin ku saabsan shaqadeenna la xiriirta:

- Wada Xiriirada Gudaha
- Diiradda Horumarinta Xirfadeed
- Qandaraaska Hogaamiyaha Dugsiga
- Qaab-dhismeedka Kulamada

Kooxda iyo Qaab-dhismeedka Kulamada:
Isbaddal ku dhacay dhanka hoggaanka toddobodii sano ee u dambaysay iyo soo noqoshada iyo samaynta joogtada ah ee cudurkii saf-marka ahaa ayaa caqabad ku ahaa ururkeena. Aad bay anigu ahmiyad wayn iigu lahayd inaan shaqaalaheena dadaalka badan u dhiso dhaqan xasillooni, xamaasad iyo farxad leh. Bixinta shax urur oo leh qaab-dhismeed cad oo ah howlaha iyo mas'uuliyadaha iyo mudnaan-siinta kuwaas oo kaabaya waxa shaqaaluhu ka shaqaynayeen ayaa muhiim u ahayd in la sii wado. Samaynta xidhiidh joogto ah iyo diirad taasoo loo marayo kulammo maalinle ah oo aan la yeesho Ku-xigeenadeyda iyo Madaxa Shaqaalaha, kulamo toddobaadlaha ah ee aan la yeesho Madaxda Qaybaha iyo bishiiba mar lala yeesho Kooxda Fulinta oo dhammaystira waxay gacan ka geysaneysaa dhisidda xiriirro xooggan, dareen kooxeed, iyo xiriir caafimaad qaba oo ku saabsan hiigsi iyo faahfaahin.

Kulmadeenna isbuuclaha ah ee aan la yeelano Madaxda Qaybaha waxay na siiyaan fursad aanu isaga warbixinno shaqadeena, ku korno koox ahaan iyo saxiibo ahaanba, aanna si qoto dheer uga hadalno mawduucyo qaas ah oo la xiriira waxyaabaha aan mudnaanta siinno. Kulmadeenna isbuuclaha ah ee aan la yeelano Kooxda Fulinta waxay siiyaan Kormeereyaasha Dugsiga iyo Madaxda Qaybaha fursad ay ku qiimeeyaan xogta heerka dugsi iyo/ama in laga wada hadlo istraatiijiyad iyo qorsho lagu daahfurayo ama lagu ballaarinayo barnaamij gaar ahaaneed. Kulamadaani waxay muhiim u yihiin koritaanka xirfadeed, waxayna taageeraan xiriirka joogtada ah iyo warcelinta, marka laga soo tago wadashaqaynta iyo xiriirka asalka ah oo dhaca maalin kasta.

Kormeerayaasha Dugsiga waxay ciyaaraan door muhiim ah oo u dhaxeeya dugsiyadeena iyo xaafiiska dhexe. Isagoo hoggaanka u haya kooxeheena gobollada, Kormeeraha Guud ee Dugsigu wuxuu ku sameeyaa dib u eegis xogta natiijada ardayga ee bil walba, taasoo iyaga u ogollaata iney fahmaan baahida dugsi walba. Intaa waxaa dheer, waxay siyaan tababar iyo talo hoggaanka iskuullada oo ku saabsan wax walba hadday laga soo bilaabo waxbaridda ilaa hoggaaminta. Waxaan aragnay koror la taabaan karo (bogga bandhigga 5aad) marka loo yimaado fahanka iyo mahadnaqa maamuleyaasha iskuulladu ay ka qabaan taageerada ay ka helaan shaqaalaha xaafiska dhexe. Tani waxaa ugu wacan fahamka cad ee Kormeerayaasha Dugsiyadu ay u leeyihiin doorkooda iyo maalgelinta dheeraadka ah ee aan ku samaynay qaabka gobolka si aysan wax walba u hoos imaan hal qof. Xaqiijinta in Kormeerayaasha Dugsiga iyo kooxda hoggaanka dhexe ay u shaqeeyaan si wada jir ah oo ay u arkaan degmadeena mid keliya oo aan loo arag 119 dugsi oo la isku geeyay ayaa muhiim u ah buuxinta baahiyaha ay qabaan dhammaan ardaydeena.

Qandaraaska Hogaamiyaha Dugsiga:

Tan iyo maalintii koobaad waxaan iri ma heli karno degmo weyn ilaa aan haysano koox hogaamineed oo adag oo degan oo fahamsan shaqada tacliinta, yaqaana sida loo taageero shaqadaas si hawlgal ah oo taageero ilmaha oo dhan, iyo iney ixtiraamaan lana macaamilaan shaqaalahooda. iyo qoysaska. Waxaan bishiiba mar la imaadaa golaha Hoggaanka Dugsiga iyo Ku-xiigeenada si codka iyo fikirka hogaamiyaha dugsiga loo siiyo mudnaan kolka aan samaynayno go'aamada yaryar iyo kuwa waaweynba. Waxaan sidoo kale sanadkii tagay la shaqaynay golaheena Hoggaanka Dugsiga si aanu wax uga bedelno qandaraaska maamulaha dugsiga ee hadda jira. Soo jiidashada iyo sii haysashada hoggaamiyeyaal dugsi oo xooggan waxay lama huraan u tahay guusheena. Waxaanu kordhinay mushaharka aasaasiga ah, waxaanu siinay fursado badan oo waxbarasho iyo xirfadeed waxaana ku darnay gunnooyin lagu dhiirragalinayo iney sii joogaan. Qandaraaskan cusub waxa uu ahaa mid wakhti dheer soo daahay, waxaana aanu aragnay sanadkan in ay yaraadeen Hogaamiyayaasha Dugsiyada oo shaqada ka tagaya marka loo eego sanadkii hore. Sanadki la soo dhaafay 14 hoggaamiyeyaal dugsi ayaa shaqada isaga tagay iyaga oo aanan jago kale ka qabaneynin dugsiyada BPS. Sanadkan kaliya 5 hoggaamiyeyaal dugsi ayaa shaqada isaga tagay.

Filashooyin Cad, Tababar iyo Horumarinta Xirfadeed:

Kooxda, si gaar ah qeybta dugsiyada iyo kooxda tacliinta, waxay soo saareen oo ay isku dubarideen horumarin xirfadeed oo macno leh oo loogu talagalay hoggaamiyeyaasha iskuuladeena iyo barayaasha. Hoggaamiyeyaasheena dugsiyada waxaan diiradda saarnay Tayada Qorshayaashooda Dugsiyada (boggaga bandhigga 6-9) iyo filashooyinka guud iyo saddexda mudnaan ee: (1) Diiradda Waxbaridda, (2) Dhaqanka iyo Cimilada iyo (3) Soo Xaadirista. Intaa waxaa dheer, waxaan siinay tababarka iyo filashooyinka cad ee ku aadan xoojinta waxbaridda heerka 1-aad ee guud ahaan dugsiyadeena oo dhan.

Waxaanu sidoo kale saacado dheeraad ah oo horumarin xirfadeed siineynaa barayaasheena (waajib ku ah macalimiinta, xirfadlayaasha waa lagu casuumaa) oo ku saabsan hirgelinta waxbarasho loo dhan yahay. Waxaanu ka codsaneynaa barayaasheena inay si ka duwan uga fikiraan sida aan ugu adeegeyno ardaydeena. Waa mid si cajiib muhiim u ah inaan siino aqoonta iyo tababarka ay ubaahan yihiin inay guul ku gaaraan. Horumarintan xirfadeed waxaa la qaban doonaa bilowga sanad dugsiyeedka soo socda waxayna noqon doontaa wax lagu daro sanadka oo dhan.

Wada Xiriirada Gudaha:

Ugu danbaynti, sanadaan waxa ay aheed mid ay diirada saarantahay sidii loo hagaajin lahaa wada xiriirka

gudaha. Waxaanu nahay urur balaaran oo leh mas'uuliyado badan. Xaqiijinta in shaqaalaheena ay ka haystaan fahan dhamaystiran oo ku saabsan ahmiyadaheena iyo sida ay shaqadooda ula xiriirto ayaa u oggolaaneyso inay lahaadaan kalsooni ay ku gutaan shaqadooda. Mid kamid ah waxyaabaha ugu horreeyo ee aan u fiirsaday ilaa goortii aan dib ugu soo laabtay degmada ayaa ahayd in kooxdeena ay aad ugu wanaagsan yihiin qorshaynta iyo xeeladaynta laakiin ay aad ula dhibtoodaan fulinta iyo hirgelinta. Waxaan isticmaalay isbarbardhigga 80/20 kaasoo garoonka hoos ugu dhigayo ciyaar qurxan laakiin 20-ka yaardi ee ugu dambeeyo aanan la woodin in dhibco la dhaliyo.

Yeelashada qaab-dhismeedyo dhammeystiran, khadad wada xiriiir oo wanaagsan iyo awoodsiinta hogaamiyayaaasha iyo kooxaha ee heerarka oo dhan si go'aano loo qaato ayaa muhiim u ah xaqiijinta in la saaro dib udhacyada halka qayb kadhaca iyo siriqyada imaan kara si loo sii wado shaqada on la qabto oo la dhammeystiro. Intaa waxaa dheer, waxaan abuurnay kooxo shaqo isweydaarsiyo gudaha ah si markaa dhammaan saamileyda muhiimka ah iyo waaxaha ay qayb oga ahaadaan qorshaynta iyo fulinta shaqada. Tani waxa ay kacaawisay waaxo kala duwan in ay fahmaan doorkooda, ay samaystaan iskula xisaabtanka shaqada ayna arkaan isku tiirsanaanta qotoda dheer ee kajirta degmo teena la'eg taasoo markii hore caqabado ku abuuraysay in shaqada ay horay u sii socoto.

Sida lagu xusay warbixinta CGCS ee Badbaadada Dugsiga, sii kala qaybintan lahaanshaha iyo gudashada ayaa sidokale kadhacaysay dugsiyada oo dhan iyo waaxyaha degmada iyadoo looga jawaabayo dhacdooyinka halista ah. Waxaanu horumarinay marinka wada xiriirka si aan wax uga qabano marxaladan dhacdooyinka halista ah ee Dugsiga iyo Degmada labadaba iyo shaacinta balaaran ee saameyneyso Bulsho-weynta dugsiyada BPS. Waxaan qornay qawaaniin si aan u xaqiijino qof walbo inuu helo farriin iskumid ah, oo lagu helo luuqada hooyo ee la doorbido, kana timaado degmada ee aysan ka imaan il kale.

Shaqadan oo dhan–qaab dhismeedka kulanka, fahamka cad ee doorarka iyo mas'uuliyadda, horumarinta xirfadda, iyo wada xiriir cad ayaa door muhiim ah ka ciyaara dareensiinta shaqaalaha in la qadariyo ayna kamid yihiin koox. Marka laga yimaado horumarinta xirfadda ee dugsigeena ku saleysan, waxaan mudnaan siiyay u abuurista waqti iyo booska PD kooxdeyda fulinta. Waxaan kaqeyb qaadanay Mashruuca Hoggaanka Waxbarashada Dadweynaha ee Harvard (PELP) iyo dhawr kulamo iyo tababaro ay marti galisay Golaha Dugsiyada ee Magaalo Weynta (CGSC). Tani waa hawl adag waxaana ku guulaysan karnaa oo kaliya haddii dhammaanteen aan hal dhinac doonta uwada wadno. Waxaanu sii wadi doonaa dhisidda iyo xoojinta kooxdeena, laakiin maalin kasta sharaf ayey ii tahay inaan kor kala socdo shaqaalaheena oo samaynaya waxyaabo lala cajabo. Ka hoggaamiye ahaan, waa mid muhiim ah muujinta qadarinta dadaalkaas shaqada iyo inaan iskeeno inaan xallino mushkilad markii uu jidku soo xirmo. Yeelashada dhaqan xirfad leh oo adag iyo koox taariikh u leh guusha oo kashaqaynayo dugsiyada BPS kana go’antahay inay si wadajir ah ushaqeeyaan muddada fog waxay waagi hore ahayd mid adag laakiin waa wax hada usocdo jihadi saxda ahayd waana muhiim in ay sii ahaato arin diirada la sii saaro si aan uga soo baxno shaqada.

DARAJADA GUUD (Waxay eegtaa horumarka xagga yoolalka iyo qeybaha waxqabadka)

	SI AAD AH WAX KU OOL AH (Ku dayasho mudan)
X	**WAX KU OOL AH (Karti Leh)**
	KOR USOO KACAYO (Karti Leh)
	SI HOOSE WAX KU OOL AH (Ubaahan Hagaajin)
	MA AHA WAX KU OOL (Laguma Qanci Karo)

KALIYA QIIMEYNTA WAXBARASHADA: HEERARKA DARAJOOYINKA
(Geli 'X' sanduuqa darajada ku habboon ee heer kasta)

E	P	NI	U	
	X			**Heerka I: Hoggaaminta Waxbaridda**
	X			**Heerka II: Maamulka iyo Hawlaha**
	X			**Heerka III: Ka Qaybgalinta Qoyska iyo Bulshada**
	X			**Heerka IV: Dhaqanka Xirfadeed**

Qorshaha Horumarinta Shaqaalaha (EDP)

Aqoonso oo qeex 2-3 aag oo awood ay ka jirto iyo 2-3 aag oo sii wadida koritaanka ah oo ku saleysan qeybaha kore, iyo sidoo kale sida aad u timid meelahaan.

Dhinacyada lagu wanaagsan yahay	Dhinacyada sii wadista koboca
Horumarinta hiigsiga tacliinta loo dhan yahay oo xooggan ee ardayda oo DHAN, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo barnaamijka dugsiga sare.	Horumarinta hiigsiga ka baxsan ku lug lahaanshaha Qoyska iyo Bulshada oo loo gudbo mid ka mid ah Kaqeybgalka Qoyska iyo Bulshada oo dhab ah.
Horumarinta labadaba nidaamyada waaweyn iyo kuwa yaryar iyo qaab-dhismeedyada hawlgallada si looga caawiyo dhisidda taageero degmo oo si sare u shaqeyneyso oo leh aragti tacliin loo dhan yahay oo xooggan.	Sii wadida iyo soo saarista istiraatiijiyad wada xiriir iyo qorshe kahortag ah ee aan ahayn ka daba-tag, oo ay u wada dhan yihiin saamileyda oo dhan, oo labada ah mid wax ku ool ah oo firfircoon.
Abuurista dhaqan iyo maskax leh filashooyin sare iyo xirfad ay saldhig u tahay go'aan qaadasho xog ogaal ah oo kooxda u xoojineyso maskax ahaan oo ay u wada dhan yihiin saamileyda dibedda.	Ka shaqeynta si loo soo saaro iskaashiyo shaqo oo xooggan oo lala yeesho Guddiga Dugsiga, Golaha Deegaanka, Duqa Magaalada, hay'adaha magaalada, hay'adaha gobolka iyo mehredaha Boston, dugsiga sare kadib, iyo shuraakada bulshada ku saleysan iyo kuwa macaash-doonka aan ahayn si kor loogu qaado kheyraadka iyo fursadaha guud ahaan aaggaga mudnaanta leh ee dugsiyada BPS.